

Caawimada Maaliyadeed ee Park Nicollet Health Services

Financial Assistance at Park Nicollet Health Services—Somali

Park Nicollet Health Services waxay bixisaa caawimo maaliyadeed. Macluumaadka ku saabsan xaq u yeelanshaha, sida loo codsado, iyo sida loo xisaabiyo caawimada maaliyadeed ma si buuxda ayaa loogu qeexay Siyaasadda Caawimada Maaliyadda ee Park Nicollet. Si bilaash loogu helo koobiyo Siyaasadda Caawimada Maaliyadeed iyo foomamka codsiga si online ah, si loo codsado koobiyo bilaash ah iyadoo boosta lagugu soo dirayo, ama caawimo la xidhiidha nidaamka codsiga, fadlan booqo ama la xidhiidh Park Nicollet sidan soo socota:

Bogga internetka: parknicollet.com/FA
Goobta: Cusbitaalka Park Nicollet Methodist
South Admitting, Suite 1-615
6500 Excelsior Blvd
St. Louis Park, MN 55426

Telefoon/Fakis: 952-993-5586 La-talliyayaasha Maaliyadeed
952-993-7672 Adeegyada Loo-adeegaha
888-826-6958 Adeegga loo-adeegaha – Telefoonka bilaashka ah
952-993-2770 Fakiska – Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka

XAQ U YEELANSHO

Park Nicollet Health Services waxay xisaabisaa caawimada maaliyadeed iyadoo ku salaynaysa dakhliga qoyska bukaanka iyadoo barbardhigaysa waxa lagugu magacaabo Heerka Faqiirtinimo ee Federaalka (FPL). Bukaanaada dakhliga qoyskoodu uu ka yaryahay 275% FPL ka waxuu heli doonaan qiimo dhimista ugu weyn. Ka saraynta 275% ee FPL, heerka caawimada maaliyadeed waxay ku salaysnaan doontaa dakhliga qoyska, xajmiga qoyska, waddarta ku dalicidda daryeelka. Fadlan raad raac Siyaasadda Caawimada Maaliyadeed ee Park Nicollet wixii macluumaad dheeraad ah. Haddii bukaanku uu helo degdeg ama daryeel kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah goobta Methodist oo uu xaq u leeyahay caawimada maaliyadeed, Methodist kuma dalici doonto in ka badan qadarada guud ahaan ay biilasha ku bixiyaan bukaanaada leh caysmiska caafimaad.

SIDA LOO CODSADO

Si loo codsado caawimada maaliyadeed, bukaanaada waxa waajib ku ah inay buuxiyaan foomka codsiga oo ay ku soo celiyaan shaqsi ahaan Park Nicollet, iyagoo ku soo diraya boosta ama fakis iyagoo isticmaalaya macluumaadka lagala xidhiidhayo ee xagga sare ku xusan. Bukaanaada waxa la waydiin doonaa inay keenaan dukumenti caddaynaya dakhliga (sida soo celinta cashuurta dakhliga federaalka) iyo macluumaad ku saabsan caymiska daryeel caafimaad ee bukaanka ee hadda ama la heli karo (sida Medicaid, Medicare ama keen caymis). Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la jaan-qaad Siyaasadda Caawimada Park Nicollet ama la xidhiidh Xafiiska Loo-adeegaha 952-993-7672.

TURJUMAADAHA

Turjumaadaha Siyaasadda Maaliyadeed ee Park Nicollet, foomka codsiga, ranslations of Park Nicollet's Financial Assistance Policy, application form, oo koobidda luqad fudud ayaa lagu heli karaa luqaddo dhawr ah oo loogu talloagalay bukaanaada Ingiriisidoodu ay xaddidan tahay, iyadoo loo tixgali-nayo bulshooyinka ay u adeegto Park Nicollet. Turjumaadaha hadda waxa lagu heli karaa Spanish, Somali, iyo Vietnamese. Koobiyo bilaash ah, fadlan booqo bogga internetka ee Park Nicollet ama codso koobiyo adigoo isticmaalaya macluumaadka lagala xidhiidhayo ee xagga sare ku xusan.